

## **WARGELIN KU SOCOTA DAD-WEYNAHA: XUQUUQDAADA HOOS TIMAADA XEERKA QODOBKA VI EE XEERKA XUQUUQAHA MADANIGA**

Waaxda Gaadiidka Minnesota [Minnesota Department of Transportation (MnDOT)] waxaa ka go'an inay xaqiijiyaan in qofba aan laga reebin inay ka qaybqaataan, aan loo diidin manfacyada, ama haddii kale aanan loo geysan karin takoor ku salaysan jinsi, middab, asal qaran, jinsiga, da', naafonimo, ama xaalad daqli mid ama dhammaan barnaamijyada, howlaha, ama adeegyada ay maarayso waaxda sida uu qabo Qodobka VI ee Xeerka Xuquuqaha Madaniga ee 1964 iyo mas'uuliyiinta takoor la'aanta la xiriirta. Waxaa intaa dheer, Waaxda Gaadiidka Minnesota [MnDOT] waxaa ka go'an inay xaqiijiyaan in barnaamijyadeeda ay ku darto in ay heli karaan ama isticmaali karaan dadka ay aqoontoodu Af-Ingiriiska xadidan tahay.

Shaqsi kasta ee rumaysan in iyagu, shaqsi ahaan, ama xubin ahaan shaqsiyaad gaar ahaan, ay qabsatay ama lagu sameeyay takoor iyadoo sal looga dhigay jinsi, middab, asal qaran, jinsiga, da', naafonimo, ama asal qaran waxay cabasho takoor u soo dirsan karaan waaxda MnDOT iyaga oo isticmaalaya foormka cabashada oo ay kala soo bixi karaan bogga internetka ee MnDOT ee Qodobka VI. Foormka cabashada iyo hanaanka loo maro oo warqad caadi ah oo ku qoran luqaddaha Isbaanish, af Soomaali, Hamong, iyo luqaddo dheeri ayaa sidoo kale la heli karaa marka aad soo dalbato. Bogga internetka ee Qodobka VI ee MnDOT waa: <http://www.dot.state.mn.us/civilrights/titlevi.html>

Badalkeed, cabashada waxaa toos loogu diri karaa Maamulka Waddo-weynta Federaalka [Federal Highway Administration] adiga oo cabashada boosto ugu soo diraya cinwaankan Minnesota Division Office, 380 Jackson Street, Suite 500, St. Paul, MN, 55101. Telefoonka: 651-291-6100.

Haddii aad u baahan tahay in xogtan laguugu tarjumo luqaddo kale, ama xogta qaabab kale laguugu soo gudbiyo, fadlan la soo xiriir Kim Collins, Agaasimmaha Xafiiska Xuquuqaha Madaniga, 395 John Ireland Blvd., MS 170, St. Paul, MN 55155, [Kim.Collins@state.mn.us](mailto:Kim.Collins@state.mn.us).

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Barnaamijka Qodobka VI ee MnDOT, fadlan tixraac *MnDOT Title VI and Nondiscrimination Implementation Plan (MnDOT Qodobka VI iyo Qorshaha Hirgelinta Takoor la'aanta ee laga helo xiriiriyaha bogga Qodobka VI)* ee bogga internetka ee MnDOT ee sare ku qoran.